



Raadinta Daryeelka Carruurta Da'da Iskuulka ah Maadaama Dugsiyadu Dib U Furmayaan

Talaabooyinka Guusha: La shaqeynta Xarumaha Daryeelka Carruurta iyo Iskuulada

Samee Qorsho

1. Go'aanso cidda daryeeli doonta ilmahaaga inta dadka waaweyn ee qoysku ay shaqeynayaan. Qoysasku waxay tixgelin karaan xulashooyin badan oo ay ka mid yihiin daryeelka carruurta haysta shatiga ama qoyska, asxaabta iyo deriska ama isku dhafka daryeelialyaal badan.
2. Baro ilaha kaalmada dhaqaale ee kaa bixin kara dhaqaalahaa daryeelka carruurta. Xarunta Caawimaada Qoyska ee Child Care Aware ee Washington ayaa ku caawin kara. 1-800-446-1114
3. Inaad iskuulka cunuggaaga ka soo oggato waxa ay ugu baahan yihiin waxbarashada khadka tooska ah/fog.

Xulo Bixiyaha Daryeelka Carruurta

1. La xiriir Child Care Aware ee Washington si aad uga hesho caawimaad bilaash ah oo ku aadan raadinka/helitaanka bixiyeyaasha daryeelka carruurta kuwaas oo u adeega carruurta gaaray da'da iskuulka, xarumahaas oo adiga kuugu dhow. Ka eeg sanduuqa midig ku yaal si aad u aragto waxa aad raadineyso.
2. Booqo daryeel bixiye kasta oo aad doorato kahor intaan la gaarin maalinta ugu horreysa ee ilmahaaga aadayo halkaas, xittaa haddii ay tahay booqasho khadka ah maadaama uu jiro cudur safmaren ah.
3. Bar ilmahaaga dhammaan daryeeliaashooda kahor intaan la gaarin maalinta ugu horreysa, xittaa haddii ay tahay isbarasho khadka tooska ah.

La Shaqee Macallinka Ilmahaaga

1. Ogeysi macallinka ilmahaaga cidda daryeeli doonta ilmahaaga inta lagu jiro saacadaha ay ardaydu wax ka baranayaan khadka tooska ah. Xaqiji in macallinka ilmahaagu uu haysto magacyada iyo macluumaadka lagala xiriirayo dhammaan daryeeliaashaa ilmahaaga.
2. Saxeex foomka siideynta oo u oggolaanaya macallinka ilmahaaga inuu daryeeliaasha ilmahaaga kala hadlo qorshooyinka iyo tilmaamaha waxbarashada khadka tooska ah.
3. Daryeeliaasha daryeeliaza cunuggaaga la wadaag jadwalka iskuulka ilmahaaga inta lagu jiro xilliyyada waxbarashada khadka tooska ah. Dhamaan daryeeliaasha waxaad ogeysiisaa wixii isbedelo ah.

Diyaari Cunuggaaga

1. Daryeeliaasha ilmahaaga iyo shaqaalaha iskuulka kula dhaqan xiriir wanaagsan oo ku dayasho mudan. Adkee oo ku celceli in aad dhamaantiin isku koox tiihin.
2. Ku tababar gelitaanka aalada uu ilmahaaga u isticmaali doono waxbarashada khadka tooska ah, kuna tababbar xirashada maaskarada muddo dheer.
3. U sharax ilmahaaga sababta aad u dooratay daryeelka aad xulataay.

Bixiyeyaasha daryeelka carruurta waxay ka caawin karaan qoysaska shaqeynta ee qaba carruurta gaartay da'da iskuulka ee da'doodu tahay 5-12 kuwaasoo u baahan daryeelialyaal taageeri kara waxbarashada khadka tooska ah/fog.

Child Care Aware ee Washington waxay caawimaad bilaash siisa qoysaska raadinaya daryeelka carruurta. Qoysasku waxay khadka ka raadin karaan xarumaha daryeelka carruurta ee u adeegga carruurta gaartay da'da iskuulka <https://childcareawarewa.org/families/> ama waxay wici karaan Xaruntayada Caawimaada Qoyska si ay uga helaan caawimaad oo luuqad kasta ah.

1-800-446-1114

Waxyaabaha laga fiiriyo adeeg-bixiye daryeelka carruurta: Istaraatijiyadaha Ka Hortagga Cudurka COVID-19

- Barnaamijku miyuu si firfircoona uga shaqeynayaan ka hortagga faafitaanka COVID-19 iyadoo lagu dhaqmayo kala fogaanshaha bulshada, xirashada maaskaraha, dhaqidda gacmaha iyo nadaafad dheeri ah?
- Keenista iyo qaadista ilmaha miyaa loo maareeyaa qaabab yareynaya is-dhexgalqa qoysaska badan isla markaana yareynaya baahida xubnaha qoysku ay u qabaan inay galaan xarunta?
- Hubinta caafimaadka miyaa loo sameeyaa cunug kasta kahor intaynaan gelin barnaamijka?

Bey'ad waxbarasho

- Barnaamijku ma taakuleyn karaa baahiyaha waxbarashada khadka tooska ah ee ilmahayga?
- Hawlaha ma ku habboon yihiin da'da iyo danaha ilmahayga?
- Shaqaaluhu ma dhiirigeliyan xirfadaha luuqadeed, xirfadaha bulshada iyo xirfadaha xalinta dhibaatooyinka marka ay la hadlayaan carruurta?

Shati/Laysin

- Laysin bixinta waxay soo kordhisaa kormeer iyo shuruudo dheeraad ah. Xaqiji in adeeg-bixiye kasta oo aad doorato uu shati haysto adigoo booqanaya <https://www.findchildcarewa.org/>

